


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Yexesqeel: Ninkii Aragtiyada



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Lazarus
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.


Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Wakhti aad u sii horreeyey, Ciidan awood leh baa soo
weeraray Yuhuuda, dadkii Ilaah oo badan baa
maxbuus ahaan loo kaxaystay.



Meel aad uga fog waddankoodii, Yuhuudan waxay ku
noolaayeen meel wabiga oo ay joogeen wabi keebaar.
Waxaa iyaga ka mid wuxuu ahaa adeege
Ilaah, Nabi exesqeel.



Maalin baa, Ilaah wuxuu siiyey Yexesqeel
aragti. Ammaanta Ilaah baa ugu muuqatay
sidii wax u eg afar xayawaan. Midwalba afar
waji buu lahaa iyo afar baal. Xaggooda sare
way qurux badnayd widhwidhaysa, waxaa
la buuxay iftiin u eg dhuxul caddaatay
falaaraheeda qaanso roobeed oo kale ah.
Markii uu Yexesqeel waxaa
arkay, wuxuu
u dhacay
wajigiisa.



Ilaah baa la hadalay. "Waxaan kuu dirayaa reer binu Israa'iil oo ah dad caasiyiin ah oo igu caasiyoobay."
Gacan baa u soo muuqatay, oo waxaa ku jira qorniin duuduuban.
"Cun qorniinkan duuduuban"
Ilaah baa sidaa yidhi, "Tag waxaad la hadashaa guriga reer binu Israa'iil."





Muxuu yahay amarkan oo kaler! Laakiinse Yexesqeel wuu yeelay, wuu cunay qorniinkii oo wuu tagay.



Ruuxii Ilaah baa dhftay Yexesqeel oo u qaaday isaga
degta kale ee degtii kale ee maxaabiistii Yuhuudda
ku noolaayeen ee
webigii Kebaar.

Toddobo maalmood
buu fadhiyey meeshii
ay iyagu fadhiyeen.
Wuuna ka yaabay
wuxuu ku arkay
meeshaa. Deedana
Ilaah gaarhaye
(Waardiye) ayuu
ka dhigay
Yexesqeel.






Yexesqeel wax badan oo la yaab leh ayuu ku sameeyey Ereygii Ilaah oo masaxy dadkii. Wuxuu xardhay sawirka Yerusaalem jab yaroo sayn dhooba ah. Malaha dadkii garbihiisa ayay dul taagnaayeen markii uu sawirayay ciidamadii xoogga badbnaa oo ku hareereysan Ilaaha qudduuska magaaladiisii oo u ahaan doonto goor dhow in la burburiyo.




Israa'iil, boqrtooyadii woqooyi, waxay Ilaah caasi
ku ahaayeen muddo gaaraysa 390 sanadood, oo
Yuhuudana, boqortooyadii koonfureed muddo
gaaraysa 40 sanadood iyana.





Sababtaas bayn ahayd sababtii loo burburiyey oo u ahaatay inay Yuhuda degdegto dhiciddeeda oo dunto. Ilaah wuxuu u sheegay Yexesqeel inuu dhigo dhinaciisa bidixda 390 maalmood, deedn dhiniciisa midigtana dhigo 40, inuu soo xusuusiyo dadka sanadahoodii dembiga.









Laga yaabee inay dadkii ay
bilaabeen inay fikiraan inuu
Yexesqeel yahay nin qalaad oo
la yaab leh. Wuxuu sameeyey
waxwalba oo uuIlaah ku yidhi
inuu sameeyo. Maalin buu
timaha xiirtasy, oo saddex
qeybood qayb wuu gubay.




Middani waxay tusaysayin
saddex qaybood qayb ka mid
ah dadkii Yerusaalem la dhiman
doonaan cudurro iyo macluul
markii ay soo weeraraan
ciidanka Baabiloon caasimadda.




Yexesqeel wuxuu qaaday qaybtii saddexaad ee
timihiisii oo ku jaray seef, tani waxay tusaysaa in
saddex meelood meel dadka ku dhiman doonaan
seefta cadowga.





Saddex meeloodka ugu dambeeyan, Yexesqeel inay la carari doonto dabayl. Laakiin wuxuu ku toli doonaa inyaroo tiimhiisii ah dacalka marada si Ilaah calaamo ugu noqoto. Inuu ku dhowro Dadkiisa nabdoonaa iyo inuu ku soo celiyo dhulkii ballanta.




Nebigii geesiga ahaa maxaabiistii
Yuhuudda wuxuu u sheegay iany
arrintu sii xumaan doonto oo
ay ka sii dari doonto, aysan
ahayna kana wanaagsanayn
sida ay rajaynayaan,
dadkii way ku cadhoodeen
Yexesqeel, laakiin
waxuu iska sii watay
inuu ku hadlo
Ereygii Ilaah.




Macbudkii dhexdiisa, Yexesqeel, Ilaah wuxuu ku tusay waxyaalo faalasho, bahalo aan daahir ahayn, iyo sanamyo. Waxyaalahan mayna u ahaateen weligeed Macbudka Ilaah. Hoggaamiyayayashii baa ku caabudi jiray waxyaalahan




intii ay ahayd inay caabudaan Ilaah.



Weliba Ilaah Yexesqeyaal wuxuu tusay ammaantiisa inay ka tagtay Macbudka oo la burburiyey. Markii ii minaan dhamaday, Yexesqeel wuxuu u sheegay Yuhuuddii waxyaalaha waxay ahaayeen.







Wax walboo Ilahay sii sheegay run bay
noqdeen. Yerusalem waa la burburiyey. Dad
badan baa halaagamay. Markii ay Yuhuudda
kuwii maxaabiis ahaanta loogu kaxaystay
Baabiloon ay maqleen, waxay la yaabeen
haddii Ilaah iska daaya dadkiisi weligood.




Laakiin Ilaah wuxuu siiyey farriin
kale Nebigiisii. Wuxuu Yexesqeel
ku hagay dooxo ay lafo bani'aadan
ka buuxaan.




"Wiilka Aadanahow, lafahan may nool yihiin?" Ilaah baa Yexesqeel weyddiiyey. "SAYIDOW Ilaahow, waa ogtahay," Yexesqeel baa sidaa ku jaaabay. Waa sida ay tahay laa engagay dib dambe uma noolaan karaan.




SAYIDKU wxuu leeyahay, "Wax sii sheegidda lafahan, oo leh, lafaha ingegeanow, maqla ereyga Rabbiga! Waad noolaan doontaa." Markii uu addeecay, Yexesqeel wuxuu maqla cod sawaxan ah. Maxaad u malaynaysaa waxa sababay taa iyada ah?




Isla intii uu nebigu eegayay tacajabkaa,
jidhkii baa isku yimid oo lafahii baa mid
ba lafteedii kale doonatay.




Deedna, jidhkoodii baa soo noqday.



Oo diirkii haragooda ayaa dul saarmay
iyagii, laakiin neefi maysan ku jirin iyaga.



SAYIDKU wuxuu yidhi, "Wax sii sheegidda, wiilka aadanhow waxaan ku leeyahay "La imow afarta neefood oo neefso. Ku neefso ama afuuf halkan yio halkaas inay nooladaan iyagu." Markii uu Yexesqeel sidaa sameeyey, neeftii baa soo gashay iyaga.



Weyna noolaadeen, oo ku istaageen cagahoodii.
Ciidan weyn baa iminka buux dhaafiyey dooxadii.



Ilaahay wuu ogaa inay Yuhuudda Baabiloon ay rajo dhigeen markii Yerusaalem dhacday. Isagu wuxuu farriin kula hadlay Yexesqeel muujintiisii. "Lafahan waxaa weeye gurigii reer binu Israa'iil," Ilaah baa sidaa yidhi. "Ruuxaygaan galin doonaa, oo waxaan ku gaynayaa dhulkaad lahayd."



War maxay tahay farriintan weyn ee rajada leh ee ka timid Ilaah! Ballantii Ilaah ee YExesqeel so martay waxay rumowday markii dambe ee Yuhuudda ku soo noqdeen dhulkoodii. Waxay garteen inuu Ilaah ku soo celiyey guryahoodii.



Ereyga Ilaah
weligii waa run.



Yexesqeel: Ninkii Aragtiyada

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Yexesqeel

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

